

# **Xubno ka tirsan Dhaqdhaqaaqa Islaamiga ah ee Al-Islaax oo soo jeediyay in la qabto shirweyne**

**Sheekh C/qaadir Max'ed Kutub “hadafkii loo aasaasay Al-Islaax waa la marin haabaabiyay”**

Warsaxaafadeed ay soo saareen xubno ka tirsan Dhaqdhaqaaqa Islaamiga ah ee Soomaaliyeed ee Al-Islaax ayaa waxa uu u qornaa sidatan:.

Ku: Dhamaan Xubnaha Ururka Al-Islaax.

Ku: Dhamaan Shacaka Soomaaliyeed.

Ku: Midowga Maxaakiimta Islaamiga ah.



Waxaa la wada ogsoon yahay in Ururka Al-Isllaax oo haatan 25-sano jirsaday loo aasaasay ujeedooyin iyo himilooyin waaweyn oo ay ka mid yihiin, faafinta, hirgelinta dhaqanka iyo aqlaaqda Suuban, Horseedida dhismo Xukun Islaami ah lehna Hay'ado iyo Mu'asasaad saldhig u yihiin wadatashi iyo hufnaan, difaaca diinta iyo dalka iyo dhowrida midnimada iyo wadajirka ummadda Soomaaliyeed, la dagaalanka muuqalada eexda, qabyaalada iyo musuqmaasuqa, ka tarjumida danaha shacabka iyo ka dambqashada dhibkiisa, iskaashiga dhamaan xoogagga Islaamiga ah iyo wadaniga ah ee ay ururka ujeedooyinka wadaagaan iyo taageerida iyo garab siinta qadiyadda Islaamiga ah.



Hadaba waxaa ayaandaro noqotay in waayadaan dambe ay soo ifbaxday koox yar oo afduubatay ururkii ka weecday jidkiidiisii iyo ujeedooyinkiisiba kadib markii ay ku dhaqaaqeen arrimaha soo socda:

Ka fogaanta wax kasta oo muuqaal, midab Islaam leh oo idil, taasoo lid ku ah ujeedooyinkii Islaamiga ahaa ee ururka loo aasaasay, isku dhiibidda Ururo iyo dhinacyo caddow u ku ah danaha iyo ujeedooyinka ururka ee Islaamiga ah, u adeegsiga magicii iyo awoodii ururka oo idil qaab u daneynaya shaqsi, koox iyo qabiil gaar ah, taasoo ururka ka dhigay mid aan marnaba gaari Karin tiigsan karina himilooyinkii loo dhisay, u dhiidhin la'aan qadiyadda ummadda iyo arimaheeda Masiiriga ah, abaabul falal lid ku ah kacdoonka bulshada oo ay hor kacayaan Maxaakiimta Islaamiga ah, iyagoo had iyo



jeerba ku soo abaabulaya kooxo iyo qabaa'il ay is leeyihiin waad ku dhiciseyn kartaan kuna wiiqi kartaan ujeedooyinka Ururka iyo is bedelada socda.

**BAAQ:**

Kadib markii ay dhaceen arrimahaas oo idil la iskuna dayay jid kasta oo lagu sixi karayay qaladaadkaas kadib kolkii aan ka cabsanay in Ururku burburo ayaa waxaan ku baaqeynaa arrimaha soo socda.



1. Waxaan Xubnaha Ururka ee ku sugan Dibadda iyo Gudaha ugu baaqeynaa in ay isugu yimaadaan shirweyne deg deg ah oo lagu badbaadinayo loogana tashanayo aayaha iyo Masiirka ururka.
2. Waxaan shacabweynaha Soomaaliyeed u sheegeynaa in aysan jirin cid keligeed ku hadli karta magaca iyo afka Ururka Islaax, ilaa ay ka qabsoomayo shirweynaha aan kor ku soo xusnay.
3. Waxaana uga digeynaa dhamaan ururada iyo qaybaha bulshada oo idil in ay ka digtoonaadaan falalka guran ee ay kooxahaasi ku fashilinayaan waaga cusub ee u baryay shacabka Soomaaliyeed.

Xubnihii War saxaafadeedkaasi soo saaray waxaa ugu muhiimsanaa C/qaadir Max'ed Kutub, Cabdi Max'ed Abtidoon, C/kariin Xuseen Guuleed, Cumar C/raxmaan Max'ed (Cumar Daahir), iyo Sheekh Cusmaan Ibraahim Axmed iyo waliba xubno kale.



**Qore: Amiin Yuusuf Khasaaro**

**E-Mail [amiinkhasaaro@hotmail.com](mailto:amiinkhasaaro@hotmail.com)**

Afeef: Aragtida qoraalkan waxaa leh qoraaga ku saxiixan

Faafin: [www.SomaliTalk.com](http://www.SomaliTalk.com) | June 26, 2006